



Ma nabad baa,

Iska bixinta lacagta daryeelkaaga caafimaad waxaa ku kici kara kharash badan. Waxaan rabnaa inaan hubino inaad hesho caawinta aad u baahan tahay oo dhan. Warqadan waxaa ku qoran arji ku aadan Kaalmo Dhaqaale. Waxaad weli codsan kartaa Kaalmo Dhaqaale xitaa haddii aad caymis leedahay. Waxay kaa caawin kartaa inaad bixiso kharashyada sida qayb-bixinta caymiska, lacagaha lagaa jaraayo ama saamiga boqolayda caymiska.

U-qalmitaanku wuxuu ku salaysan yahay dakhligaaga sanadlaha ah, kaas oo lagu go'aaminayo dakhligaaga guud (wadarta guud ee dakhliga ka hor lacag jarista) ee qoyskaagu helay 4 toddobaad ee la soo dhaafay. **Fadlan dhammaystir oo ku soo celi arjiga isagoo ay la socdaan dhammaan agabyada taageerada ee la codsado.** Waa kuwaan tusaaleyaal caddayn u ah dakhliga:

- Canshuurcelinta dawladeed ee ugu dambeysay, haddii lagaa rabo inaad xareysato.
- Diiwaanada lacagbixinta ee 4 toddobaad ee isku xigxigta ee hadda u dambaysay. Iyadoo ku xiran dakhligaaga, tani waxay noqon kartaa:
 - o 4 diiwaano lacagbixineed haddii la bixiyo toddobaad kasta
 - o 2 diiwaano lacagbixineed haddii la bixiyo labadii toddobaadba mar
- Haddii aad iskaa u shaqeysato, bayaanka faa'iidada & khasaaraha ee qeexan
- Macaashka Sugnaanta Bulshada ee sannadka hadda socda, iwm.
- Warqadda Kaalmada Guud ee Hadda
- Bayaanka macaashyada shaqo la'aanta ama magdhowga ee 4-tii toddobaad ee ugu dambeeyay
- Caddaynta kale ee dakhliga ee aad heshay 4-tii toddobaad ee la soo dhaafay, sida taageerada carruurta, masruufka, gunnooyinka, ku guulaysiga bakhtiyaanasiibyada, ama gunnooyinka abaalmarinta ah
- Dakhli ma lahan? Bixi bayaan oo sharxaya xaaladdaada hadda iyo sida lagu taageeri karaayo. Haddii aad ku nooshahay meel ka baxsan kaydanka, bixi bayaannada bangiga ee billihii ugu dambeeyay.

Codsiyada la helo ee aan wadan dokumeentiyada waajibka ah oo dhan lama abali dono waana laguugu soo celin doonaa. Haddii ay dokumeentiyadaada oo idil la socdaan codsigaaga, waxaad naga filan kartaa inaad aqbaar nooga hesho 60 maalmood gudahooda. **Oggolaanshuhu kama dhigna dammaanad kaalmo maaliyadeed; ka reebitaannada qaarkood ayaa lagu dabaqi karaa.**

Fadlan xasuusnow in inta lagu jiro hannaankan **koontooyinkaaga aan la hayn doonin**, oo ay sii noqon doonaan kuwa duugooba. Waa **inaad ka qaybqaadataa** hannaankan, adigoo bixinaya macluumaad dheeraad ah marka la codsado si looga hortago ururinta suurtoogalka ah. Qorshayaasha lacag-bixinta waxay u baahan yihiin iany faylka ay ku jiraan macluumaadka kaarka deynta ama bangiga si loogu habeeyo qorshaha lacag-bixinta bilaha ah.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah, fadlan kala xiriir xafiiskayna lambarka bilaashka lagu waco **(866) 804-2499**.

Mahadsanid,

Adeegyada Maaliyadeed ee Bukaanka MaineHealth
(MaineHealth Patient Financial Services)

OGEYSIISKA

Daryeelka Caafimaadka ee Bilaashka ah ee loogu talagalay Dadka Aan Awoodin inay Iska Bixiyaan Kharashka — 2025

Sharciga Maine wuxuu dhigayaa in daryeel caafimaad oo bilaash ah ay waajib tahay in la siiyo dadka deggan Maine ee dakhligoodu ka hooseeyo boqolkiiba 150 heerka saboolnimada fadaraalka. MaineHealth waxay siisaa daryeel bilaash ah oo buuxa dhammaan bukaanada **ku sugan ama dakhligoodu ka hooseeya boqolkiiba 200** heerka saboolnimada. Dadka deggan New Hampshire ee daryeelka ka hela Memorial Hospital iyo/ama dhakhaatiirta kale ee la shaqeeya MaineHealth ayaa sidoo kale u qalmi kara barnaamijka daryeelka bilaashka ah.

Cabirka Qoyska	150 %	200 %
1	\$23,475.00	\$31,300.00
2	\$31,725.00	\$42,300.00
3	\$39,975.00	\$53,300.00
4	\$48,225.00	\$64,300.00
5	\$56,475.00	\$75,300.00
6	\$64,725.00	\$86,300.00
7	\$72,975.00	\$97,300.00
8	\$81,225.00	\$108,300.00
Dheeraad Walba	\$8,250.00	\$11,000.00

Si aad u dalbato kaalmo dhaqaale, fadlan naga soo wac:

- Xafiiska Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka lambarka: lambarka sida bilaashka ah lagu waco **866-804-2499** inta lagu gudajiro wakhtiyada shaqada Isniinta ilaa Jimcaha socoto 8 subaxnimo-4:30 galabnimo.

Dalacaadyada Ma Dhaafeyso Tirada Guud ahaan loo Diray Medicare

SHaddii lagu oggolaaday kaalmada dhaqaale sida ay dhigayso siyaasaddayadu oo oggolaanshahaaguna aanu daboolayn 100 boqolkiiba lacagta adeegyada aanu kuu qabanay, lagugu soo dallici maayo wax dheeraad ah oo loogu talagalay daryeelka gurmada ah ama daryeelada kale ee caafimaad ahaan daruuriga ah, marka loo eego xaddiga caadi ahaan lagu dallaco bukaanada caymiska leh.

Daryeelka caafimaadka ee daruuriga ah oo kaliya ayaa lagu bixiyaa si bilaash ah. Haddii aadan u-qalmin daryeelka caafimaadka ee bilaashka ah, waxaad codsan kartaa dhagaysi xaqsoor ah. Waanu kuu sheegi sida loo codsado dacwad-dhagaysiga caddaalada ah.

La-talinta Maaliyadeed ee MaineHealth

Codsiga Kaalmada Maaliyadeed ama Qorshaha Lacag-bixinta La Kordhiyay

Waxaan codsanayaa: Kaalmo Maaliyadeed ☐ Qorshaha Lacag-bixinta La Kordhiyay ☐ Labadaba ☐

Warbixinta Codsadaha

Magaca Koowaad	Magaca Dambe	Taariikhda Dhalashada	
Cinwaanka	Magaalada/Gobalka/Zip	Telefoonka	
Heerka Guurka (<i>ikhtiyaari</i>)	Shaqo-bixiyaha (qor dhammaan 4-tii toddobaad ee ugu dambeeyay)	Taariikhda Bilowga iyo Mushaarka	

Xaaska/Warbixinta Codsadaha Dheeraadka ah (Guursaday ama Lamaaneyaasha Qoyska ee Diawaangashan oo Keliya)

Magaca Koowaad	Magaca Dambe	Taariikhda Dhalashada	
Telefoonka #	Shaqo-bixiyaha	Taariikhda Bilowga iyo Mushaarka	

Ku tiirsaneyaasha (Dhammaan Codsadeyaasha Ka Yar 18 Sanno Jir oo Imminka La Deggan Codsadaha)

Magaca	Taariikhda Dhalashada	Xiriirka ka dhaxeeyo Codsadaha	Aqoonsiga MaineCare #

Dakhliga Qoyska

Codsadaha iyo qoyska waa inay bixiyaan canshuur-celinta dawladeed ee sannadkii la soo dhaafay oo dhameystiran, ama bayaanka dhigayo dakhli la'aanta.

Hadduu Qoyska Qaato:	Qaddarta Bishiiba:	Codsadaha Waa Inuu Bixiyaa:
Dakhliyada/mushaaraadka laga helo shaqo-bixiyaha(badrooniyada)	\$	Risiidyada mushaarka ama warbixinta mushaarka ee 4-tii isbuuc ama 12-kii bilood ee ugu dambeeyay ee shaqo walba oo muujinayo dakhliga guud <u>IYO</u> canshuur-celinta Dawladeed ee sannadkii la soo dhaafay oo dhameystiran.
Iskaa U Shaqaysiga/Dakhliga kirada	\$	Bayaanka faa'idada ama khasaaraha ee billhii ugu dambeeyay ama 12-kii bilood ee la soo dhaafay <u>IYO</u> canshuur-celinta dawladeed ee sannadkii la soo dhaafay oo dhameystiran.
Shaqo-la'aan, Curyaannimada Muddada Gaaban (STD), Curyaannimada Muddada Dheer (LTD) ama macaashyada magdhowga shaqaalaha	\$	Wargelinta qaansheegashooyinka toddobaadlaha ah ee muujinayo dakhliga guud AMA faahfaahinta mushaarka ee 4-tii isbuuc ama 12-kii bilood ee la soo dhaafay ee laga helay shaqo-bixiyaha ee muujinayo lacagta naafonimada.
Amniga Bulshada ama SSDI	\$	Warqada faa'idada sannadka hadeer. Si aad u codsado nuqulka warqadda macaashkaaga, wac 1-800-772-1213 ama booqo www.ssa.gov . Foomka 1099 lama aqbalo
Faa'idooyinka Shaqo ka fariisiga ama Howlgabka	\$	Warqada ama bayaanka macaashka (401K, IRA, iwm.) ee muujinayo dakhliga guud ee la qeybiyay.
Kaalmada Guud	\$	Macaashka Kaalmada Guud ee Bisha socota.
Dakhli la'aanta 3-dii bilood ee la soo dhaafay	\$	Bayaanka sharaxeya taageerada aad heleysid, uu saxiixay qofka bixinayo taageerada. Haddii ku noolaanshaha keydinada, waxaad sidoo kale u baahaneysaa inaad sheegtid bayaanada bangiga ee billihii ugu dambeeyay.
Taageerada Garoobta/Canuga	\$	Nuqulka amarka maxkamadda AMA jeegaga ama risiidyada kharashaadka oo 4 toddobaad ah.
Qeybsashada/Danaha	\$	Bayaanada faa'idooyinka saami ee saddex biloodlaha AMA bayaanada bangiga ee billihii ugu dambeeyay.
Wax kale	\$	Ku guuleysiga bakhtiyaa-nasiibyada, dakhliyada aan mushaarka ahayn, shaqooyinka lacagta caddaanka laga helo, iwm. 4-tii toddobaad ee la soo dhaafay

Fadlan u gadi dhinaca kale ee foomka.

MaineHealth waxay haysaa kheeysraad ay kugu caawiso:

Dadka degan Maine & New Hampshire waxaa loo gudbin karaa Kooxda Kaalmada Bukaanka MaineHealth si loo baaro MaineCare/NH Medicaid ama barnaamijyada kale ee gobolka iyo federaalka. Waxaad si toos ah nagala soo xiriiri kartaa wixii macluumaad dheeraad ah 1-833-644-3571.

Dadka deggan Maine Waxay sidoo kale codsan karaan MaineCare ayagoo wacayo **1-800-442-6003** ama booqo <https://www.maine.gov/benefits/accounts/login.html>

Dadka deggan New Hampshire Waxay sidoo kale codsan karaan NH Medicaid ayagoo wacayo **1-603-447-3841** ama booqo <https://nheasy.nh.gov>

***KHARASHYADA LOOMA BAAHNA HADDII AAD KALIYA CODSANAYSO KAALMO DHAQAAL**

Qorshaha Lacag-bixinta ee La Kordhiyay oo Kaliya		Lacag-bixinta bilaha ah ee la codsaday:			
<i>To Si loo caddeeyo qorshe lacag-bixineed ee la kordhiyay, fadlan ku dar macluumaadka soo socda ee la xiriira kharashyada qoyska</i>					
Fadlan qor dhammaan kharashaadka billaha ah ee khuseeyo qoyska codsadaha:					
Kharashka:	Lacag-bixinta Billaha ah:	Kharashka:	Lacag-bixinta Billaha ah:	Kharashka:	Lacag-bixinta Billaha ah:
Guriyeynta (amaahda guriga/kirada)	\$	Shidaalka/Saliida (Kululeynta)	\$	Kaararka Bangiga	\$
Canshuuraha Hantida	\$	Deynta Sinnaanta Shaqiga/Guriga	\$	Kharashaadka Caafimaadka	\$
Milkiilayaasha guriga/Caymiska Kireystaha	\$	Daryeelka Carruurta	\$	Kharashaadka Dheeraadka ah:	
Korontada iyo Biyaha:		401K/403B (Haddii jeegga mushaarka ee laga jaro aan lagu darin)	\$		\$
Telefoonka Guriga/Telefoonka Gacanta	\$	Deynta Baabuurta	\$		\$
Korontada	\$	Caymiska Baabuurta	\$		\$
Biyaha/Bulaacada	\$	Bansiinka Gaariga	\$		\$
Fiilada/Satalaydka	\$	Raashiinka/Alaabta Qoyska	\$		\$
Internet-ka	\$	Kharashaadka Rabaayadaha	\$		\$

Waxaad ku soo diri kartaa foomka codsiga oo dhameystiran iyo dukumiintiyada:

Ku soo mayl gareey: MaineHealth - PFS Attn: Financial Counseling 22 Bramhall Street Portland, ME 04102	Ku fakis gareey: (207)-661-8043	Codso oo ku xarey dukumiintiyada MyChart: mychart.mainehealth.org
---	---	---

Fadlan xasuusnow inaad ku dartid nuqulka warqadaha caddeynaya dakhligaaga.

Waxaan xaqiijinayaa in warbixinta la bixiyay, oo ay ku jiraan dakhliga, ay run oo sax yihiin inta aan ogahay. Waan fahamsannahay in warbixinta aan gudbiyay ee la xiriirto dakhligayga sannadlaha ah iyo tirada qoyska ay xaqiijin karaan MaineHealth. Waxaan sidoo kale fahamsannahay in haddii wax ka mid ah warbixinta aan gudbiyo la go'aansado inay been tahay, go'aaminta noocaas ah waxay sababaysaa diidmada siinta adeegyada sida Kaalmada Maaliyadeed, oo waxaan mas'uul ka noqon doonaa dalacaadaha adeegyada la i siiyay.

Saxiixa Codsadaha _____

Taariikhda _____

Saxiixa Codsadaha Labaad _____

Taariikhda _____

Wixii su'aalo ah ee la xiriir codsigan, fadlan kala xiriir kooxdeena Adeegga Macaamiisha lambarka bilaashka lagu waco ee (866) 804-2499.